Sheeko-fara badan

Sheekada 1aad: Haweenay Simbaabwiyad ah

Waxaan u dhashay waddanka Simbaabwe. Waxaan ku noolaa waddanka Ingiriiska gudihiisa 14 bilood. Waxaan imid magaalada London kadib markaa waxaa la ii diray magaalada Glasgow. Yurub marna matagin laakiin waxaan safar ku soo wareegay waddamo ku dhaw Simbaabwe. Farqiyada ka jira halkaan maahan kuwo aad iigu cusub aniga maxaa yeelay waxaannu ahayn mustacmarad Ingiriis, waxaannu leenahay dhismayaal waaweyn iyo tikniyoolajiyad. Dhismayaasha halkani in kastoo ay u muuqdaan kuwo dhagax ah isla markaana gaboobay. Waxaan filayey in wax walbaa noqon doonaan wax birqaya oo dahab ah! Waddankayga waxaad maqlaysaa Boqortooyada Ingiriisku waa waddan qani oo dhaqaale fiican leh.

Waxaan ka imid magaalada labaad ee ugu ballaaran waddanka Simbaabwe. Asal ahaan wax waan ka sheegi karaa xaaladda halkaa ka jirta in madax-weynuhu yahay mid wax-isku soo kooba. Wuxuu awoodda haystay 25 sanadood hadda hadana ma uu doonayo inuu siiyo qof kale fursad. Wax ka khuseeyaa ma jiraan qabaa'ilka kale ama xitaa dadka ka tirsan qabiilkiisa. Qofkii isku daya inuu ka hor yimaado ninkaas dan iyo heello lagama laha - laakiin haddii aad la socoto isaga, qofkaasi wuxuu noqon karayaa saaxiibkiisa wanaagsan. Haddii la ogaado in aad mucaarad ku tahay Mugaabi waxaa laguu geysan karaa tacaddi dhimasho ah ayadoo lagu garaacayo, ama nolol lagugu gubo ama lagu caburiyo ilaa aad ka dhimato. Xitaa wuxuu tababar siinayaa dhalinyarada yar yar si ay wax u dilaan! Wararkii ugu dambeeyay waxay sheegayaan inuu leeyahay xeryo halkaas oo carruurta lagu tababaro si ay wax u dilaan. Ma filaysaa inuu yahay qof caadi ah? Waan necbahay ninkaas!

Ma ahan macnuhu rabitaan halkaan ah. Ma qiyaasi kareysaa ka tegista carruurtaada ayagoo yar-yar da'dooduna kala ahayd, 5 iyo 7? Waxaan ka soo cararayey oo kaliya xukunkiisa. Carruurtaydu waxay uga baahan yihiin daryeel iyo jacayl hooyadood iyo aabahood, Aad iyo aad ayaan u tebayaa carruurtaydii. Waxaan xubin ka ahaa xisbiga MDC. Waxaan qaybin jiray waraaqaha warsidaha ah iyo funaando. Waa intaas! Waan

jeclahay waddankayga, Waxaan rajeynayaa inaad gurigayga joogo, laakiin garan maayo haddii arintaani aanay weligeed dhammaan doonin. Carruurtayda waxaa daryeela aabahay. Hooyadayo waxaannu weynay dhawr bilood kahor maxaa yeelay Booliiska ayaa yimid gurigayga ayagoo I raadinaya aniga, markii ay I heli kari waayeenna, waxay hooyaday weydiiyeen, "Aaway ninkii?" Markii ay tidhi garan maayo meel uu jiro derbiga ayey madaxa ugu garaaceen, isla markaa kadibna waxay u dhimatay dhaawacyadaas madaxa kasoo gaaray. Xitaa awood uma lahayn aan ku aaso hooyadey.

Waxaa i soo gaaray go'aan diidmo ah dacwaddeydii magangalyo-doonnimo, maxaa yeelay lama aaminsana in aan xubin ka ahay MDC. Garan maayo wax aan sameeyo hadda. Garan maayo intay le'eg tahay goorta layga cayrin doono falaadkayga.

Waxaan ku ducaystaa in madaxweynuhu jagada ka tago markaa kadib suurtagal ay ii noqoto inaan wadankaygii ku laabto isla markaana carruurtaydii aan arko. Laakiin had iyo goor waxaa jira taageero badan oo loo hayo mugaabi xilliga lagu jiro ololaha doorashada maxaa yeelay wuxuu ka qaataa cunnadamardimaha dukaannada isla markaana, si uu taageero u helo, siiyaa cunnada dadka. Sidaa darteed si dadku u saxariiraan ama u ogaadaan muhiimadda uu leeyahay isagu. Waa in aad leedahay Kaarka Shaqada Qaranka ama adiga iyo qoyskaaguba way saxariiri doonaan haddii aadan taageerin isaga.

Shayga kaliya ee ugu wanaagsan joogitaanka Ingiriisku waa waxaan ka nabad galay dilaayaashii. waa intaas! Taasina waa sababta aan uga faquuqmay qoyskaygii. Waa necbaystay arintaas, isla markaana hooyaday oo dhimatay aniguna aan tegi kari waayey meeshaas si aan u aaso iyada wadnaha ayey igu dhufataa. Halkanna maba ay aaminsana xubin innaan ka ahay MDC, hooyadeyna waan waayey ficilladeydii dartood carruurtaydiina waan ka gooniyoobay! Waxay iga dhigtaa mid neceb Boqortooyada Ingiriiska gebi ahaanteedba, adduunka oo dhanna waan nacaa maxaa yeelay hooyaday ma ag istaagi karo! Carruurtaydii ayaan ka walwalaa maalin walba.

Mustaqbalkana? Waxaan rajeynayaa in ninkaasi xukunka ka dego isla markaana anagoo dhami aan ku noqono qoysaskayagii: taasina waa salaadayda maalin walba. Adduunku waa og yahay waxa Mugaabi samaynayo, mana fahmayo sababta bulshada caalamiga ahi uga gaabinayaan in ninkaas awoodda laga qaado. Maxaa wax adag ka dhigay? Weliba way awoodeen inay gumaystaan halka uu nin kaliya kayahay hadda. Ii sheeg adigu, waxa aad u maleynayso in sababtu tahay?

Sheekada 2aad: Haweenay Soomaaliyad ah

Soomaali ayaan ahay. Waa yaab: Soomaaliya dawlad ma laha, madaxweyne majiro hadana sharci iyo kala dambayni kama jirin muddo 13 sano ah. Qof kastaa wuxuu rabaa inu madaxweyne noqdo waxaana jira qabaa'illo fara badan garabyo taasoo haddii qof madaxweyne noqdo la dili doono ama waddanka laga cayriyo, markaa kadib qof kale madaxtinnimada qabto. Waa wax xun! Waa wax qaab darro ah isla markaana kharbudaad ah. Aad bay u adag tahay in loogu sharraxo qof Reer galbeed ah: Kama dhaadhicin kareysid dagaal sokeeye qof aan arkinin. Sidee ayaad ku qeexi kareysaa bulsho aan gebi ahaanba lahayn wax sharci ah, amar iyuo kala dambeyn?

Qof kasta oo Soomaaliya ku nooli waa hubaysan yahay; Kama hadlayo bastoolada biyaha, Waxaan ula jeedaa hubka culus. Markii aad jidadka u baxdo waxaad arki kareysaa qori saaran sagaf awoodna u leh inuu rido 6 xabadood il-biriqsigiiba. Waa fajiciso, jah wareer baqdin leh. Aniga xageyga waxay ii ahayd weerar joogto ah maalin iyo habeyn. Waan maqli jiray qoryo dhacay, guryo la boobayo, dumar la kufsanayo, rag la laynayo, carruuro la kufsanayo laguna dilayo waalidkood hortiisa, dhammaan noocyo waxyaabo laga noxo hareerahayga ka dhacayaan.

Aabahay xabad ayaa lagu dilay hooyadayna hortayda ayaa lagu kufsaday (Waxaan jiray 12 sano waqtigaas). Waalidkay waxay dhinteen sanad gudihiis midba mar. Aabahay toogasho ayaa lagu dilay maxaa yeelay waxaa la aaminsanaa inuu taageero koox, laakiin wuxuu ahaa dhexdhexaad. Ma aysan garwaaqsan isla markaana way dileen. Dadku aad ayey uga cabsi qabaan duruufaha markay doonayaan awood; ninna ma aaminaan.

Aabahay wuxuu kasoo jeeday dad yar oo Hindi ah. Wuxuu guursaday haweenay Sawaaxili ah markaa wuxuu ahaa guur jinsiyado isku-dhaf ah kaas oo gebi ahaanba aan la aqbalin, isla markaana wax naadira ah. Dadku waa ogol yihiin ninkii guursanaya haweenay midabkeedu furan yahay laakiin ma ogola haddii uu guursado mid midab jirkeedu madaw yahay! Siyaasad ahaan sax maahan in la sheego arintaan laakiin waa siday tahay. Marka caruuri timaaddo halkee ayey leeyihiin? Bulshada madowga ahi waxay leeyihiin, *"tag oo na dhaaf madow ma tihide, Hindi baad tahaye! Tag oo ku laabo meeshii aad ka timid."* Laakiin aniga ma ihi Hindi waxaan ku dhashay Afrika! Maxaad iga filaysaan inaan sameeyo? Xagee ayaad ii
rajeynaysaa inaan aado?

Sidaa awgeed ku noolaanshaha waddanka Ingiriiska nabad ayaan ku qabaa! waa waddan dhaqammo kala duwan leh una adkaysta carruurta jinsiyadaha isku-dhafka ah sidaa awgeed xaalad wanaagsan ayaan ku jiraa. Dadku way I fiiriyaan aniga waxayna u maleeyaan inaan ahayn Aasiyaan, maxaa yeelay timo adag ma lihi, waxaan leeyahay timo toosan. Markii aan iraahdo waxaan ahay Afrikaan waxay yiraahdaan "Ma dhici karto, sidee u noqon kartaa?" Waxaa ku nool Afrika bulsho ballaaran oo Hindi ah dadkuna waxay u arkaan wax ka yaabiya sidaa awgeed waxaan u qeexaa: waddooyinka tareenka, ganacsigii Carbeed. Waad ogtihiin waa wax adag oo isku dhafan. Kadib waxaa jiray gumaysi: waxaad *'dulleysateen'* Afrika badhkeed!
Tanina maysan ahayn oo kaliya Ingiriiska laakiin Faransiiska, Dhajka, Talyaaniga dhammaantood isku soo duuboo!

Waxaan ahaa canug keligiis ah, oo aan caadi ku ahayn Africa. Sida caadiga ah waxaa jira 22 ilmood qoyskiiba inuu ka kooban yahay! Carruurta kale ayaan ka hinaasay lakiin waxaan ku farax sanahay in aabe lahaa naftaydu. Hadda oo waalidkay dhintayna waxaa aad u dareemaa kelinimo: Dib ayaan isaga dhigaa arintaas dhammaanteed, Waxaan rabaa wiilal walaalo ah iyo gabdho walaalo ah! Ilaa intii aan ka imid Glasgow waxaan yeeshay saaxiibbo badan. Waxaan leeyahay qof ii ah sidii walaal ila soo koray. Wuxuu ogaaday in aanan ku lahayn cidna adduunka isaga mooyee wuxuuna yidhi "*hagaag, hadda waxaan ahay walaalkaa!"* Si ayey u adag tahay in aan ku xad gudbo walaalkay maadaama uu

yahay caddaan sida caanaha oo kale ah - laakiin I daryeela, waa nacaybka ka dambeeya arrinta. Waxaan u yeedhi karayaa saacaddu markay tahay 2:00am kuna dhihi karaa, "Aad baan u murugays nahay ……" taas oo xaqiiqdii ah wanaag.

Waxaan halkaan joogay 3 sanadood waana jeclahay, intaan ka ahayn hawada! Hawadu waa wax aan caadi ahayn oo daran! way ba'an tahay, waxaan ula jeedaa waa roobabow, madoow, gareey ….. waan sii wadi karaa laakiin waa qaab darro. Intaa ka sakoow, magaalada Glasgow way wanaagsan tahay. Waxaan tegay magaalada London waana necbaystay. Halkaan waxaad la sheekaysan kartaa qof kasta oo boosteejada baska taagan hubaalna sida cad kaftan ayaad ka helaysaa iyaga laakiin magaalada London dhexdeeda waxay ku leeyihiin "waa dhillo" ama "na dhaafi naagta waa waalan tahaye," London waa magaalo dadku aminsan yahay inay isku koobnaadaan, aad u aamin daran - sida magaalooyinka kale ee isla weyn sidaan qiyaasayo.

Sheekada 3aad: Nin reer Suudaan ah

Waxaan ahay Suudaani halkanna waxaan joogay 18 bilood. Halkan waxaan imid keligay. Aad ayey meeshani iigu adag tahay aniga. Halkaan qof keligii ah ayaan ku ahay sidaa darteed aad ayey iigu adag tahay in aan la qabsado kelinnimada. Waxaan ka samaystay saaxiibbo yar waddankaygii laakiin way igu adagtahay in aan xiriir la samaysto dadka Iskootishka. Caqabado ayaa u dhexeeya dadka Iskootishka iyo ajnabiga guud ahan sidaan filayo. Waxaan maqlay magangalyo dooneyaal badan oo ka cabanaya waaya aragnimada Magaalada Glasgow laakiin xaqiiq ahaan taydu ma xuma. Dadka qarkii waxay yiraahdaan dadka ku nool magaalada Glasgow waa dad qalafsan, oo neceb ajnabiga lakiin marna iguma aysan dhicin aniga wax daran. Dhab markaan u hadlana waxaan filayaa Glasgow waa magaalo soo dhaweyn wanaagsan. Marar badan ayaan magaalada u dhex galay lakiin meelaha qaarkood lama sameeyo xiriir dadka Iskootishka; Waxaan u baxaa oo keliya socod iyo sawirro iska qaadid, dhammaan waxyaabahaas oo dhan aniga ayaa naftayda u sameysta.

Markaad isu maleyso naftaadu qof qaxooti ah, si keli ah, way adag tahay waxaanad dareemaysaa dareen xun. Waxay wax u dhimaysaa kalsoonidaada. Waxaan arkaa

qaxootiyo aqoon leh isla markaana doonaya inay wax u qabtaan waddanka. Waxay doonayaan inay ku noolaadaan nolol caadi ah laakiin awood uma laha qaxootinnimo darteed. Xitaa haddii aad hesho aqoonsiga qaxootinnimo waxay kugu qaadaneysaa waqti sidii aad nolol caadi ah u dhisi lahayd.

Waddanka Suudaan gudihiisa dhibaatooyin fara badan ayaa ka jira. Guud ahaan dadku waxay uga baxaan Suudaan sababo siyaasadda ku lug leh si ay uga baxsadaan dhibaatooyinka qabiil. Waxaan u muuqday in aan ahay qof ku nool waddan aanay laga daryeelin xuquuqda bini-aadamka; wax kastaa waa kugu dhici karaan adiga, ayadoo aan sababi jirin, isla markaana maba lihid xuquuq aad naftaada ku difaacatid. Waa lagu caddibi karaa ama lagu xiri karayaa waqti kasta; mana lihid wax xuquuq bini-aadam ah oo aasaasi ah!

Weli xiriir waxoogaa ah ayaan la leeyahay qoyskaygii. Waana tebaa qoyskayga waxaanan rajeynaya in maalin maalmaha kamid ah aan ku noqon doono meeshaas. Waxaan keliya oo doonayaa in aan ugu noolaado naftayda sida qofii kasta ee kale ugu nool yahay. Qof walbaa wuxuu leeyahay riyooyin, doonayaana inuu gaaro hiyi laakiin waxba kama aanan qaban karin waddankayga, waxaan rajeynayaa in aan helo fursad aan halkaan uga qabsado. Waxaan tababar ku qaatay dhakhtarka xoolaha waddankaygii markaan joogay isla markaana waxaa hadda I soo gaaray waraaqahaygii aan ku joogi lahaa meeshaan sidaa awgeed waxaan joogi doonaa magaalada Glasgow iskuna deyi doonaa in aan shaqo raadsado. Waxaan sameyn doonaa imtixaanka Dhakhaatiirta Qalliinka Xoolaha ee Royal College sidaa awgeed waxaa suurtagal ii noqonaysa inaan dhakhtar xayawaan ka noqdo Boqortooyada Ingiriiska (UK).

<u>Sheekada 4aad: Nin reer Suudaan ah</u>

Waxaan ahay Suudaani. Si toos ah ayaan u imid Iskootland qiyaastii 1 sano muddo laga joogo. Keligay ayaan halkaan ku ahay. In kastoo aan ahay qof keligiis ah waxaan leeyahay dad badan oo qaraabo ah oo aan waddankii uga soo tegay sidaa awgeed aad iyo aad ayey u adag tahay keli ahaanshuhu. Aad ayey u adag tahay saxiibbo cusub in la sameysto; saaxiibbo yar oo waddankaygii ah ayaan leeyahay laakiin ma jiraan fursado

badan oo aad kula kulmi karto dadka Iskootishka. Ogolaansho ayaan u haystaa iskuulka iyo imkaaniyaadka kale ee halkaan kajira laakiin bannaanka aad uguma baxo. Codsigaygii magangalyo doon waa la diiday waxaanan sugaya in aan maxkamad aado, welina taariikh ma ahayo. Waxaan filayaa in guud ahaan magangalyo dooneyaasha loola dhaqmo si wanaagsan laakiin xagga gudaha aan si wanaagsan loola dhaqmin. Garan maayo sababtu waxay tahay, laga yaabee inaysan na jeclayn innaga. Waxaan filayaa inaysan waxba naga aqoonin innaga. Waxaan rajeynayaa in aan ku noolaado nolol caadi ah, wax barto oo shaqeysto - waxaan jeclaan lahaa in aan ku shaqeeyo kumbuyuutarrada. Waxaan filayaa haddii magangalyo dooneyaasha laga siin lahaa shaqooyin magaalada Glasgow waxaa jiri lahaa fursado wanaagsan oo lagula xiriiri lahaa bulshada. *Hadana,* Haddii la siin lahaa fursadda ay uga shaqeysanayaan halkaas way badan yihiin - Waxaan filayaa 90% - waxay doonayaan inay sameeyaan wax waxtar u leh naftooda iyo bulshada ay ku dhex nool yihiin. Waxaa na haysata dhibaato lacageed oo weyn sidaad ogtahay, waxaa jira shaqooyin fara badan oo magangalyo dooneyaashu ay aqbali lahaayeen inay qabtaan.

Sheekada 5 aad: Nin reer Suudaan ah

Waxaan ahay Suudaani. Waxaan halkaan joogay hal sano iyo badh. Waxaan markii hore imid magaalada London kadib waxaa la' ii soo diray halkaan. Waana waqtigii iigu horreeyay Boqortooyada Ingiriiska. Waxaa jira kala duwanaansho xageyga ahaan: habka dadku u lebistaan, habka ay u qaataan cunnadooda iyo cabbitaanka, nooca ay u shaqeystaan. Ma ogolaanno in dumarku shaqeeyaan ilaa raggu awoodi kari waayo quudinteeda, markaa kadib way shaqeyn kartaa. Meeshaan qof walbaa waa shaqeeyaa xitaa haddii aad ka soo jeeddo qoys ladan. Doorka haweenaydu weli waa guriga hawshiisa waddanka Suudaan gudihiisa. Farqi kala duwanaansho aad u weyn ayaa ka jira sida dadku midba midka kale u salaamo. Halkaan dadku waa wada mashquul waxayna isi salaamaan intay soconayaan, waxay isku yiraahdaan oo keliya 'haloow' laakiin meesha an ka imid, haddii aad hadlaysid adigoo deg degsan kana tiraahdo haloow meel fog, dadku waxay waxay u qaataan in aadan xushmaynin. Waa in aad ku soo dhawaataa qofka si aad caadi ugu salaantid, sidaa ayaa aad looga yaqaan. Waxyaabaha ugu wanaagsan ee halkaan ka jiraa waa dimuqraadiyadda iyo xorriyadda. Waad sameyn kareysaa waxaad

doontid shaqci ahaan laakiin waddankayaga gudihiisa waxba ma sameyn kareysid, xitaa sharci siduu qabo! Halkaan waxaad wax ka baran kareysaa dhaqammada kale maxaa yeelay quruumo kala duwan ayaa halkaan jooga, wax badan ayaad ka kororsan kareysaa dhaqammadaas. Sidoo kale waxaa laguu ogol yahay wax alla wixii aad rabtid marka loo eego xagga waxbarashada iyo war baahinta isla markaana waxaa kaloo jira imkaaniyaadyo fara badan. Arrinta halkaan igu haysataa waa ka fogaanshaha qoyska aan ka dhashay.

Xaaladda kajirta waddanka Suudaan waa sheeko aad u dheer. Suudaan waa waddan madaxa iskula jira maxaa yeelay waxaannu leenahay qiyaastii 567 qabaa'il mid walbaana leeyahay dhaqan kan kale kaduwan iyo luqado kala duwan. Suudaan waa waddanka 10aad ee ugu weyn adduunka. Suudaan waa waddan baahsan laakiin ila intii ay madax bannaanida ka qaadatay Biritaaniya sanadkii1956 waxaa na xumayey rag yar oo aqoon yahanno ah waxayna haleeshay 10 sano oo keliya nabad. Dagaal aad u badan, oo u dhexeeyay dawladda iyo Koofurta ayaa dilay qiyaastii 2 milyan oo dad ah isla markaana badha kiciyay qiyaastii 7 milyan gudaha iyo dibedda waddanka Suudaan. Dagaal ayaa ka jira qaybta Bari ee Suudaan, haddana sidoo kale xagga Galbeedka. Anigu waxaan u dhashay Galbeedka Suudaan. Sidaa awgeed waddanku wuxuu isku deyayaa inuu ka dhammeeyo dagaalka hal dhinac halka uu ka bilaabayo dhinaca kale! Waa xaalad aad u ba'an. Doorashadii dadweyne ee ugu dambaysay waxaa la qabtay 1986.

Inta badan waddamada soo koraya waxaad ka helaysaa hay'adaha millateriga caasumadaha dhexdooda taasina waa khalad maxaa yeelay waa u fududdahay millateigu inay awoodda la wareegaan. Halkaan Reer Galbeedka dhexdiisa ah kuma aanan arkin millateri magaalooyinka dhexdooda, taas oo ah tan ugu wanaagsan! Halkaan, ciidammada millatarigeedu amar waxay u haystaan waddanka inay difaacaan, laakiin Suudaan gudaheeda waddanka ayey burburiyaan! Halkaas uma joogaan inay waddanka ilaaliyaan dadka, waxay u joogaan inay dusha ka haytaan!

Waxaan ahay xubin hormuud ka ah Dhaqdhaqaaqa Sinnaanta iyo Caddaaladda ee Suudaan. Waxaanu dooneynaa inaanu dhisno diimuqraadiyad, dastuur joogto ah oo dalku

leeyahay. Waxaannu leenahay ujeeddooyin: mid kamid ahina waa in gobollada fursad ay isku xukumaan la siiyo. Xilliyadii lasoo dhaafay dawladda waxaa laga soo dooran jiray dhinaca Waqooyiga - oo Muslimiin ah - laakiin mujtamaca Koofurtu waa Masiixiyiin. Dawladdu waxay shaaca ka qaaday in Suudaan tahay dawlad Muslim ah isla markaana aanay u ogolaan doonin in masiixiyiin xukumaan waddanka. Waxaannu isku daynaa in aannu cadaalad u keenno iyo sinnaan dhammaan dadka reer Suudaan oo dhan ayadoo an loo eegaynin diintooda. Haddii aad dhulka ku soo wareegto kuma arkeysid xubin la yaqaan oo kayimid Koofurta ama Galbeedka, intooda badani waxay ka yimaadaan Waqooyiga. Ma filayo in dadka loo abuuray inay faqri ku noolaadaan. Waxaan filayaa in faqriga laga soo abaabulay dawladda dhexe sidaa awgeed waxaannu taas ku soo bandhigeynaa ifa-faalahayaga siyaasadeed.

Kama jirto waxbarasho lacag la'aan ah oo loo hayo carruurta waddanka Suudaan gudihiisa. Waxaannu dooneynaa taas in aannu siinno qof walba isla markaana ku soo rogno carruurta waxbarashada khasabka ah. Waxaannu leenahay darajo sare oo aqoon darri ah isla markaana waxaannu rabnaa in aanu xakamayno dhibaatadaas jirta. Waqtigaan xaadirka ah waxaa jira nidaam waxbarasho oo gaar ah isla markaana 90% dadka Suudaaniyiinta ah waxay ku nool yihiin meel ka hooseysa khadka faqriga. 10% ka kale aad ayey maal u haystaan waxayna sameysteen iskuullo khaas ah. Sidaa awgeed markaa dadka aan xitaa haysanin lacag cunno, sidee ayey ku maareyn karayaan bixinta waxbarashada carruurtooda? Sidoo kale waxaa dhibaato naga haysataa waxa loogu yeedho 'xaasaska ballaaran.' Waxaad leedahay hal qoys oo ka kooban 10 ama 11 dad ah. Sidee ayaa aabbeyaashu ama hooyooyinku lacag uga bixin karaan 10 ilmood? Ma fududa; dhaqan ahaan qoysaska ballaaran waxtar ayey u lahaayeen ka shaqeynta dhulka. Waxaa jira iskuullo dawladdu leedahay laakiin waa in aad canuggaaga ka bixisaa lacagta. Macallimiintu ma helaan mushaaradooda 10 bilood (dawladduna waxba ma siiso) sidaa awgeed si canuggaagu waxbarasho hagaagsan u helo waa inaad macallinka lacag siisaa. Waxaana lagu shaqeeyaa qaab bulsho oo ah in qof kastaa ay tahay inuu lacag keeno si buugaagta loogu soo iibsado iwm.

Waxaan aad ugu faanayaa in Afrika dhexdeeda aannu nahay mid kamid ah kuwa ugu taajirsan - laakiin 90% ku nool faqri taasina waa ceeb aad u weyn. Waxaannu nahay oo keliya dad gaaraya 38 milyan waxaanan leenahay khayraad aad u fara badan. Waxaannu leenahay dhul beereed gaaraya 300 milyan oo higtaar oo dhul la beeran karo ah, waxaanu haysannaa Webiga Niil oo kusoo wareegta waddankayaga waqtigaan lajoogana waxaan haysannaa saliid. Maalintii kasta waxaan soo saarnaa 11 milyan oo barmiil! Waxaannu leenahay 30 milyan oo Lo' ah, 38 milyan oo Ido ah, 30 milyan oo Riyo ah iyo qiyaas ahaan 11 ama 12 milyan oo Geel ah! Suudaan waxay kaloo caan ku tahay soo saarista Luubaanta Carbeed taasoo loo isticmaalo daawo ahaan.

Haddii aannu dejinno dhibaatooyinkayaga waxaannu ku noolaan kareynaa nolol hagaagsan waddanka Suudaan gudihiisa. Xilliyadii la soo dhaafay Qaramada Midoobay waxy isku dayday inay xal u raadiso dhibaatooyinka jira, laakiin dawladda ayaa ka takhalustay 13 koodii mashruuc. Waxay u maleynayaan [waa dawladdee] in haddii mashaariic fara badan laga qabto Suudaan in dadku aad u ogaan doonaan waxyaabaha ku saabsan daryeelka caafimaadka iyo biyaha isla markaana maalin maalmaha kamid ah dawladda la cayrin doono doodana lasoo hor dhigo. Sidaa awgeed ayaa dawladdu uga takhalustay mashaariicdii Qaramada Midoobay si ay dadka ugu hayaan aqoon darrida iyo cudurka. Dhismeyaasha cusubi hadda waa madhan yihiin dagaalna waannu ku jirnaa maxaa yeelay waxba kama aanan helin marna imkaaniyaad ah - dawladda aannu leenahay laakiin dawlado kale ayaan ka heli jirnay - hadana ma aanan weydiisan dawladda in ay na siiso imkaaniyaadkaas, waddamada ajnabiga ah ayaa na siiyay anaga, laakiin dawladdayadii waa ayaa joojisay. Hadda waxaannu u dagaalameynaa in dawladdayadu keento waxyaabaha nolosha daruuriga u ah ama u ogolaato in dadka ajnabiga soo gaarsiiyaan. Waxaannu doonaynaa nolol hagaagsan! Mar waxaan u dagaallameynay oo keliya xuquuqaha aasaasiga ah, hadda waxaan u dagaallameynaa in aan waddankayaga xukunno. Waxaa ila qumman waxaan u baahan nahay in dadka Ingiriisku tagaan halkaas [Suudaan], sidii wixii ka dhacay Ciraaq oo kale dagaalka kahor. Waxaan u baahan nahay in dadku soo arkaan waxa jira isla markaana adduunka u soo tebiyaan! Markaa kadib waxaa laga yaaba in dadka reer Suudaan heli doonaan taageero.

Sheekada 6aad: Nin reer Falastiin ah

Waxaan u dhashay Falastiin. Waxaan joogay Iskootland 4 bilood, taa horteed 6 bilood ayaan London joogay. Waa markii iigu horreysay waddanka Boq. Ingiriiska. Keligay ayaan halkaan joogaa. Waxyaabo fara badan oo farqi ah ayaa u dhexeeya Bariga Dhexe iyo Yurub; cunnada; dharka; cilaaqaadyada iyo qoyska - waxa u dhexeeya aabbe iyo wiilkiis ama walaalaha, jaarka dhexdooda, dhammaan cilaaqaadyada oo dhami waa kala duwan yihiin. Wixii iigu cajiibsanaa ee aan ogaaday waa inta qof ee keli ahaan nool. Wax kala dhexeeya jaarkooda ama qoysaskooda majiraan.

Waxaan ku dhashay Ciraaq anoo qaxooti ah. Waan ka tegay Ciraaq si aan isugu dayo una helo waddan aan ku heli karayo waxuun xuquuqul insaan ah, si aan u helo waxoogaa dukumiintiyo ah. Sababo badan ayaa jiray. Arrintii iigu adag aniga waa ku noolaanshaha keligay anoo ah dhaqan iga duwan, dadka halkaan ku nooli ima fahmaan maxaa yeelay uguma hadlo luqadda si sax ah. Waxaa sii adkeeyay xaaladda maxaa yeelay dadku waxay daawanayaan taleefishinka wuxuuna soo bandhigaa oo keliya waxyaabo xun oo ku saabsan dadka Eeshiyaanka ah iyo Muslimiinta. Way adag tahay in xiriir lala sameeyo dadka waxaanan iska dhaadhiciyay in qof walbaa necayb ii muujin doono. Waxay u muuqataa saxaafaddu inaysan jeclayn dhaqankayaga ama fikirkayaga, taasina waa igu adag tahay aniga maxaa yeelay Ma beddali karo dhaqankayga!

Wanaagga keliya ee joogitaanka Boqortooyada Ingiriisku waa xorriyadda. Waad hadli kartaa! ma ahan macnuhu aaditanka kilabaaka iyo cabbitaanka, laakiin waxyaabaha ku saabsan xorriyadda bini-aadamka - xorriyadda oraahda. Waad sheegi kartaa waxaad doontid! Waad sheegi kareysaa wixii maskaxdaada kujira taasina waa wax lala yaabo. Gudaha Ciraaq maskaxdaada kama hadli kartid, haddii aad sidaa sameyso waa lagu qabanayaa. Kama hadli kartid waxyaabo siyaasad ku saabsan ama diin ku saabsan ama wax uun!

Waa inaad u shaqeysaa sida mashiinka laguumana ogola inaad fahantid ama su'aal wax ka weydiisid. Markii aan magalada London joogay, toddobaad kasta waxaa booqanayey Hyde Park si aan u dhageysto khudbadaha ku saabsan xorriyadda … waxay ku

saabsanaayeen dhaqanka, siyaasadaha, waxay ahayd xaqiiqdii wixii iigu fiicnaa ee aan indho saaro noloshayda!

Halkaan magaalada Glasgow gudaheeda waxaa ka jira dad badan oo caawiya magangalyo dooneyaasha kuwaas oo ah kuwo aad u wanaagsan, laakiin waxa jira sidoo kale dad aan ku fahmaynin adida; waxay daawadaan taleefishinka waxayna aaminsan yihiin taleefishinka isla markaana kuma aaminayaan adiga.